Victorian Equal Opportunity & Human Rights Commission

## Waa maxay takoorid?

Marka aan ka hadlayno qof la takooray, waxay la macno tahay in si xun loola dhaqmayo ama si aan cadaalad ahayn loola dhaqmayo sababtuna ay tahay sifo shakhsi taas oo ah mid sharcigu uu ilaalinayo. Tani waxay ka dhici kartaa meelaha sida shaqada, dugsiga ama markaan wax iibsanno ama aan helno adeeg.

Nasiib darro, dadka inta badan waxaa lagu qiimeeyaa dhinac jirkooda ama aqoonsigooda, halkii loo arki lahaa qof dhan. Victoria, waxaanu leenahay sharci dadka ka ilaalinaya xaqdarradan.

**Sidee sharcigu ii ilaalinayaa?**

Victoria **Xeerka Fursadaha Loo Siman Yahay 2010 (Equal Opportunity Act 2010)** wuxuu ka dhigayaa takoorid mid sababtoo ah sifo shakhsiyeed oo la ilaaliyo oo sharciga ka soo horjeeda. Waxaan kaa caawin karnaa xallinta cabashooyinka takoorka.

**Astaamaha la ilaaliyo**

Astaamaha uu ilaalinayo sharcigu waa:

- da'da
- naafo
- hawlaha shaqada
- oo laga saaray xukun khaniis ah
- aqoonsiga jinsiga
- dhaqdhaqaaqa warshadaha
- Galmo sharci ah
- xaaladda guurka
- heerka waalidka iyo daryeelaha
- astaamaha jirka
- aaminaad siyaasadeed ama waxqabad
- uurka iyo naasnuujinta
- xirfad, ganacsi ama shaqo
- jinsiyad
- aaminaad siyaasadeed ama waxqabad
- galmada (sex)
- sifooyinka galmada
- jihaynta galmada
- xukun lasoo qaatay
- xidhiidh shakhsi ah oo lala yeesho qof leh, ama loo malaynayo inuu leeyahay, mid ka mid ah sifooyinkan shakhsi ahaaneed.

**Goobaha la ilaaliyo ee nolosha dadweynaha**

Takoorku waa ka soo horjeedaa sharciga marka ay ka dhacdo meel dadka isugu yimaadaan. Meelahaas waxaa ka mid ah:

- daryeelka dadka da'da ah iyo hawlgabka
- bangiyada iyo caymiska
- naadiyada
- shaqada
- daryeel caafimaad, isbitaalo iyo GP-yada
- huteelada, goobaha kaamamka iyo guryaha kirada ah
- dawladda hoose
- Booliska, maxkamadaha iyo waaxaha dawladda
- xabsiyada iyo xabsiga dhalinyarada
- dugsiyada, TAFE iyo jaamacadaha

- dukaamada, makhaayadaha iyo meelaha lagu caweeyo
- ciyaaraha
- adeegyada gaadiidka
- iskaa wax u qabso.

Dadka ka shaqeeya meelahan waxay leeyihiin mas'uuliyad ay ku xaqiijinayaan inaadan la kulmin takoor.

**Takoorka goobta shaqada**

Marka loo eego Xeerka Fursadaha loo siman yahay, milkiileyaasha loo shaqeeyo waxaa saaran waajib togan oo ay tahay in meesha laga saaro takoorid intii suurtogalka ah.

Ururadu waa inay dejiyaan dhaqan caafimaad qaba oo goobta shaqada ah si ay uga hortagaan takoorid inay dhacdo, iyo sidoo kale tillaabooyin lagu hubinayo in cabashooyinka si degdeg ah oo habboon looga jawaabo.

Kuwaas waxaa ka mid ah milkiilayaasha loo shaqeeyo oo dhan waxayna dabooshaa dhammaan noocyada shaqaalaha

- wakhti buuxa, wakhti dhiman iyo mid caadi ah
- wakiilada iyo shaqaalaha qandaraasyada
- tababarayaal iyo xirfadaha kuwa loo tababarayo.

Waxayna khuseeysaa dhammaan heerarka shaqada:

- xayaysiis shaqooyinka iyo qorista
- ku soo laabashada shaqada ka dib dhaawac, jirro ama uur
- eryid iyo shaqo joojin.

**Noocyo kala duwan oo takoorid ah**

Takoorku wuxuu noqon karaa mid toos ah ama mid dadban. Labada nooc ee takooriddu waxay ka soo horjeedaan sharciga.

1. **Takoor toos ah**
   Tani waxay dhacdaa marka qof loola dhaqmo si aan sax ahayn sababo la xiriira sifada shakhsi ahaaneed ee kor ku xusan. Tani waxay badanaa sababo la xiriira malo-awaal aan caddaalad ahayn oo ku saabsan waxa dadka leh sifooyinka gaarka ah ay samayn karaan ama aysan samayn karaan.

   Tusaale ahaan, George wuxuu ka codsadaa shaqo shirkad dhismo laakiin ma helo. Markii uu weyddiiyey sababta loo dooran waayey, George waxaa loo sheegay, "Waxaan horay u shaqaaleysiinnay dad ka yimid waddankaaga. adinka dhan malihidin dadaalka shaqo ee aan leenahay oo kale."

2. **Takoor dadban**
   Tani waxay dhacdaa marka ay jirto shuruud, xaalad ama dhaqan aan macquul ahayn oo qof (ama koox dad ah) wax u dhimaysa sababo la xiriira sifada shakhsi ahaaneed.

Tusaale ahaan, warshadu waxay sameysaa dhammaan shaqaalaha inay bilaabaan 6-da subaxnimo. Tani waxay u ekaan kartaa in qof walba si siman loola dhaqmo, laakiin waxa ay dhibaato u keeni kartaa shaqaalaha u baahan in ay daryeelaan carruurta (kuwaas oo inta badan dumar ah). Haddii aysan ahayn shuruud macquul ah, tani waxay noqon doontaa takoorid aan toos ahayn.

**Ma jiraan wax ka reeban sharciga?**

Waxa jira waxyaabo ka reeban Xeerka Fursadaha Loo Simanyahay oo micneheedu yahay in aanay sharciga ka hor imanayn in la takooro xaalado gaar ah. Tusaale ahaan, takooriddu maaha mid sharciga ka hor imanaysa haddii ay jirto khatar dhab ah oo ku imanaysa qof caafimaadkiisa, badbaadadiisa ama hantidiisa. Akhri faahfaahin dheeraad ah oo ku saabsan **ka reeban (exceptions)**.

**Maxaan samayn karaa haddii la i takooro?**

Waxaad awoodi kartaa **inaad cabasho** noo soo gudbiso anaga, ama qof kale ayaa kuu samayn kara. Soo ogow sida aan dadka uga caawinno **inay xal u helaan cabashooyinka**.

Waxaan sidoo kale ku siin karnaa macluumaadka ku saabsan xuquuqdaada. Naga soo wac **1300 292 153** ama haddii aad u baahan tahay turjubaan: **1300 152 494**.